

## **Heerka ugu hooseeya ee Shahaadada Dugsiga Sare (HSC)**

### **Macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta**

Gacaliye xannaaneeyayaal iyo waalidiin

Bilaabida qorshaha heerka ugu yar ee Shahaadada Dugsiga Sare (HSC) ee Ha'yada Heerarka Waxbarashada NSW (NSW Education Standards Authority (NESAs)) oo micnaheedu yahay waa in ardayda NSW ay u baahan yihiin inay muujiyaan heerka ugu yar ee akhriska, qoraalka iyo xisaabta si ay u helaan aqoonsigooda Shahaadada Dugsiga Sare (HSC).

Ardadydu waxay u fariinsan doonaan imtixaanada heerka ugu yar HSC ee saddexda qaybood akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Imtixaan kasta oo online ah wuxuu qaadanayaa 45 daqiiqo wuxuuna u qaabaysan yahay sida soo socota:

- imtixaan jawaabta ka dooro ah oo akhris ah;
- imtixaan jawaabta ka dooro ah oo xisaab ah;
- imtixaan qoraal ah ( ilaa 500 oo eray) oo ku saleysan qoraal ama mid muuqaal kuu soo baxaya.

Ardadydu waxay u baahan yihiin inay helaan Heerka 3-aad ama 4-aad dhammaan saddexda qaybood ee imtixaanka heerka ugu yar ee HSC. Tan micnaheedu waxaa weeye in ardayda muujisa heerkaas ay leeyihiin xirfadaha shaqo ee aasaasiga ah ee loo isticmaalo nolol maalmeedka, shaqo iyo waxbarasho dheeraad ah.

Ardadydu waxay leeyihiin fursado fara badan sannad kasta oo ay ugu fariistaan imtixaanadaan online ka ah, laga bilaabo Fasalka 10-aad ilaa dhamaadka Fasalka 12-aad. Waxaa jira wakhtiyo la sugitaan oo u dhaxeya dib isugu deyida imtixaan kasta.

Ardayda waxaa taageeri doona dugsiga si ay u gaaraan heerka ugu yar ee HSC. Waxaa jira imtixaano ku barbarasho ah oo laga helayo dugsiga iyo su'aalo tu'saale online iyo website ka NESAs:

<https://educationstandards.nsw.edu.au/wps/portal/nesa/11-12/hsc/hsc-minimum-standard/online-tests>

Fadlan la xiriir dugsiga haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah.

Haddii aad rumeysan tahay in ilmahaagu leeyahay baahi dheeraad ah oo uu u qalmo shuruudo dheeraad ah imtixaanada heerka ugu yar ee HSC, fadlan wac qofka lagala xiriir dugsiga ee hoos ka muuqda:

Magaca qofka dugsiga lagala xiriir

Lambarka taleefanka qofka dugsiga lagala xiriir

Mahadsanid

Maamule

Magaca dugsiga

### **Adeega Turjumaanka Taleefanka**

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya xiriirka dugsiga, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjumaan ku hadla luuqadaada. U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefankaad dooneysid inaad wacdid, xiriiriyaha ayaa turjumaan soo gelin doona khadka si uu kaaga caawiyo wadahadal kaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.